



Ururka Waalidiinta(EV)

Ururka Waalidiintu waa Koox kamid ah Waalidiinta ,kuwaas oo ay Caruurtoodu isku Dugsi dhigtaan/aadaan, wuxuuna Ururku daryeelaa Cabashooyinka iyo Rabitaanka waalidiinta.

Dhaqaalaha Ururka Waalidiinta (kharashka Xubin ka noqoshada, Deeqaha.....) ayaa loo isticmaalaa Ardayda uu Dhaqaalaha Qoysaskoodu hooseeyo, Caawintaa kadib ayay awoodi karaan, -tusaale: in ay adaan/usafraan Maalmaha/Asbuuca projektiga.

Ururka Waalidiintu waa in ay ku dheganaadaan/haystaana sharciga/Qawaaniinta Uruka.

Sharci ahaan, Maamulka Dudsigu waa inuu dhiirigeliyaa aasaaska iyo hawlaha Ururka waalidiinta.

Kulanka guud ee sannadlaha ah ee bilawga sannad dugsiyeedka ayaa waxaa lagu doorta Guddiga maamulka waxaana laqoondeeyaa/la go'aamiyaa dhaqaalaha xubinnimada Ururka. hadii waalidku uu bixiyi lacagta xubinnimada (5,00 €– 25,00 €) ayuu xubin kayahay Ururka waalidiinta ee Sannad dugsiyaadkaas.

Guddiga maamulku wuxuu ka koobanyahay:

- * Gudoomiyaha iyo kuxigeenkiisa (ayaa hogaamiya Ururka)
- * Dhaqaalayahanka iyo kuxigeenkiisa.(ayaa maamula Dhaqaalaha/Lacagta)
- * Xoghaynta iyo ku xigeenkeeda. (ayaa qora warbixinaha/waraaqaha habeyana/qabanqaabiya projektiyada/mashaariicda)

Intaa waxaa dheer Ururkastaa waa inuu lahaadaa laba hantidhawr oo isku mid ah. Labada hantidhawr ayaana dabagal ku samaynaya dhaqaalaha Ururka.

Dhamaan waxaa lagu shaqaynayaa si iskaa wax uqabso ah, taas oo macnaheedu yahay in aanay wax dhaqaale/mushahaar ah ku heleyn shaqadooda.

Ururka waalidiintu wuxuu diyaariyaa warbixinaha dhacdooyinka amaba sawirqaadaha Dugsiga. Waxayna ka caawiyaan Macalimiinta iyo Maamulka Dugsigaba Projektiyada/mashaariicda iyo Xafladaha Dugsiga.

Ururka waalidiintu wuxuu Xubin kanoqon karaa Naadiga/Isutaga waalidiinta Fiyeena(LEVV) taasina waxay qabanqaabisaa Aqoon iswaydaarsiyo/siminaaro waxayna caawisaa Ururada waalidiinta, wakiillada waalidiinta fasallada iyo waalidka/mas' uuliyiinta caruurta.